

X. M. J. 3 Maajo 1961, lamba. 114.

Goynta mushaharka (gacanta dhaqaalala siiyo) guddoomiyahaiyo xubnaha Guddiga Shaqaynta Dowladda.

MADAXWEYNAHA KMG, EE JAMHUURIYADDA

Markuu arkay qodobbada 75 iyo 89, ee Dastuurka;

Markuu arkay Sharciga 15 Feberaayo 1961, lamba. 97 oo dhisaya Guddiga Shaqada U-shaqaynta) Dowladda;

Markuu arkay X. M. J, 15 Maarso 1961 lamba. 97 oo magacaabaya Guddoomiyaha iyo xubnaha Guddiga Shaqada (U-shaqaynta) Dowladda;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in la gooyo mushahaharka Guddoomiyaha iyo Xubnaha isla Guddigaas;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Soojeedinta Wasiirka Lacagta (Maaliyadda) oo is-af-garad kala yeeshay Wasiirka Arrimaha Guud:

WUXUU XEERINAYAA (SOO SAARAYAA XEERKAN SOO SOCDA):

Qod. 1

Laga bilaabo 15ka Maarso 1961, waxaa la siinayaa Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Shaqada (U-shaqaynta Dowladda) oo aan ahayn kuwo hore loo siiyey mushaharo cusleysteysa (ku jirta) miisaaniyada Dowladda, marka laga reebo midda la xiriirta shaqo-kafariisi, waxaa la siinayaa (ay leeyihiin) gunnooyinka soo socda:

— guddoomiye bil waliba Sh. So. 1.000 (kun) oo duuduub ah;

— Xubin bil waliba Sh. So. 700 (toddobaboqo) oo duuduub ah.

Haddii ay jiraan mushaharooyin ku jira miisaaniyadda Dowladda oo, si kale, loo siiyo, guddoomiyaha ama xubnaha Guddiga Shaqaalaha Dowladda, waxa ay xaq u leeyihiin in ay kala doortaan labadaas dhaqaale.

Qod. 2

Kharashka ka imanaya culeysyada dhaqaale, ee waaweyn, oo ku xusan qodobka hore waxaa la saarayaa cinwaanka laad, ee Miisaaniyada ku-talagalka, ee xagga sanad - maaliyadeedka 1961.

Muqdisho, maanta oo ah 5ta Maajo 1961.

Adan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Lacagta (Maaliyadda)

Cabdulqaadir Maxamed Aadan

Wasiirka Arrimaha Guud

Cusmaan Maxamuud Ibraahim

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 6, xaashi lamba. 108.

Muqdisho, 14ka Maajo 1961.

Hantidhowrka: **Axmed Dahir**